

Siyaasadda: Siyaasadda/Sharciga Kaalmada Maaliyadeed

Ujeedo:

Ujeedada siyaasaddan ayaa ah in la bixiyo tilmaamo loogu talagalay; BUKAANADA AAN MAGDHOWGA LA SIININ AMA LA SIIYAY MAGDHOW AAD U AR oo ay ku jiraan daryeelada degdegga ah iyo daryeelada kale ee caafimaad ee daruuriga ah.

Qeexitaano:

FPL: Xadka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Limit)

Caymis-heerka caymiska daaweynta caafimaad

Shakhsiyaadka cayimanayn ee aan caymiska ku jirin

Dakhliga Qoyska-dakhliga guud ee qoyska

Kaalmada Maaliyadeed: marka bukaanka loo oggolaado Samafalka iyadoo lagu saleynayo awood daridiisa bixinta lacagta adeegga.

Kaqeybqaadashada Daryeelka - Qiimo-dhimis ay bixiso Jaamacadda Utah Health (University of Utah Health) oo loogu talagalay in lagu fududeeyo culeyska dhaqaale ee bukaannada aan caymiska ku jirin.

AGB - Xisaabaadka Guud ahaan La Bixiyo (Amounts Generally Billed). Kuwaas oo la xisaabiyo iyadoo wadarta Caymiska La Ogolyahay loo qaybinayo Kharashada lagu soo dalacayo caymiska, iyadoo la isticmaalayo hab dib u eegis loogu sameeynayo 12 bilood.

Baaxadda:

Hubso in Jaamacadda Utah Health, oo halkaan loogu yaqaano U of U Health ay si isku mid ah u fuliso himiladeeda iyo ballanqaadkeeda ku aadan bukaanada/damaanadqaadayaasha ee aan la maalgelinin ama si yar loo maalgeliyey si joogto ah. Kaalmo maaliyadeed ayaa loo fidiyaa bukaanada/damaanad qaadayaasha aan awoodin inay gutaan waajibbaadkooda maaliyadeed. Baahiyaha caafimaad iyo siyaasadaha gelitaanka maaliyadeed ee waaxda ayaa shaqeeya. Kharashyada aan la cayimin iyo kharashyada aan la oggolaan waxaa loo tixgelin karaa kaalmada maaliyadeed ee ku aadan sheegashooyinka adeegyada ee barnaamijyada daryeelka Medicaid iyo Indigent.

Sharraxaada:

A. Kaalmada Maaliyadeed waxaa lagu qeexay daryeel haddiiba bukaanada/dammaanad qaadayaasha ay muujiyaan awood daro ah dhanka bixinta lacagta adeegyada loo qabtay ama keliya ay qeyb ka bixin karaan lacagta adeegyada loo qabtay. Lacag bixin kasta oo la sameeyo kahor codsiga Kaalmada Maaliyadeed laguma dari doono maadaama awoodda lacag bixinta horay loo muujiyay. U of U Health waxay cabir isdaba-joog ah u isticmaashaa kaalmada ku saleysan dakhliga FPL \* kaas oo aan ka badnaan doonin 300% dakhliga FPL si loo go'aamiyo in kaalmadu ay tahay mid buuxda ama qeyb ah (eeg jadwalka hoose).

FPL %	Assistance Discount
≤ 150%	Full Charity (100%)
151% to 200%	99% - 67%
201% to 250%	67% - 33%
251% to 299%	33% - 1%

Ansaxinta kaalmada maaliyadeed waxay ku saleysan tahay xaqiijinta dakhliga qoyska, tirada dadka qoyska iyo geedi-socodka baaritaanka ee degsan. Tirada dadka qoyska waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo la raacayo tilmaamaha la midka ah tilmaamaha IRS ee lagu ogaado ku tiirsanyaasha.

1. U of U Health waxay u baahan kartaa dukumiintiyada soo socda si loo go'aamiyo u-qalmitaanka kaalmada maaliyadeed:

- i. Codsiga lacageed oo dhameystiran
- ii. Warqad sharxeysa heerkaaga dhaqaale ee haatan ah
- iii. Nuqulka bayaanka(yada) bangiga ee hadda
- iv. Nuqulka canshuur-celinta sanadkii hore
- v. Nuqulka jeegaga mushaharka iyo/ama dakhliyada kale ee aad heshay labadii (2) bilood ee lacag bixineed ee ugu dambeeyay

B. U of U Health waxay fahansan tahay in bukaanada qaar laga yaabo inaysan awoodin inay buuxiyaan codsiga kaalmada maaliyadeed, inay u hogaansamaan codsiyada dukumiintiyada, ama laga yaabo inaysan ka soo jawaabin geedi-socodka codsiga. Natijada ahaan, waxaa jiri kara xaalado u qalmitaanka bukaanka ee kaalmada maaliyadeed ay ansaxayso iyadoon la dhameystirin codsiga kaalmada ee rasmiga ah. Xaaladahan oo kale, U of U Health waxay isticmaali kartaa ilo kale oo macluumaad si ay baahida dhaqaale ugu sameeyo qiimeyn shaqsiyeed. Warbixinta xafiiska amaahda ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa go'aaminta u-qalmitaanka. Macluumaadkani wuxuu awood u siinayaa U of U Health inay go'aan rasmi ah ka gaarto baahida dhaqaale ee bukaannada aan jawaabta soo celinin iyagoo isticmaalaya qiyaasaha ugu fiican ee la heli karo iyadoon jirin macluumaadka uu si toos ah bukaanku u bixiyo.

- C. Haddii macluumaadka loo baahan yahay aan la helin, haraaga ayaa ah mas'uuliyadda bukaanka/dammaanad qaadaha sida lagu caddeeyay Siyaasadda Ururinta Lacag Iska-Bixinta ee Jaamacadda Utah Health.
- D. Kharashka daryeelka caafimaad ee aan magdhowga laga bixin ee la siinayo dadka saboolka ah waa in loo qorsheeyaa, loo qoondeeyaa oo lagu soo wargaliyaa Isbitaalka U of U Health iyo warbixinada maaliyadeed ee gudaha iyo dibaddaba UUMG (U of U Health Hospital's & UUMG's) iyadoo la raacayo mabaadi'da guud ee la aqbalay ee xisaabinta. Qadarka Guud ahaan Loo Bixiyo (AGB) ee loogu talagalay kharashka bukaanka booqashooyinka waxaa lagu go'aaminaya habka loo yaqaan "Look Back methodology" – AGB-ga xarunta Jaamacadda Utah Health ee hadda ah waa 47%. Raacitaanka cadadka go'aaminta u qalmidda ee lagu soo dallacay kama badnaan doonto Qaddarka Guud ee Biilasha.
- E. CFO-ga Isbitaalka ama Agaasimaha Caafimaadka ayaa awood u leh inuu oggolaado ama diido kaalmada maaliyadeed ee aan buuxin shuruudaha looga baahan yahay.
- F. Muddooyinka Kaalmada Maaliyadeed kama badnaan doonaan lix bilood. Haddii caawimaad xigta lix bilood ka dib la codsado, bukaanku/dammaanad-qaadaha waa inuu dib u codsadaa oo uu buuxiyaa shuruudaha u qalmidda lixdii biloodba mar. Isbitaalka ma tixgelin doono codsiyada maaliyadeed ee hore dib-u-eegistii lagu sameeyey.
- G. Nuqulka Codsiga Kaalmada Maaliyadeed, Siyaasadda Iska-Bixinta iyo Ururinta ama Guudmarka siyaasada oo luuqad la fahmi karo ku qoran ayaa lagu heli karaa sida soo socda:
1. Telefoonka (801) 587-6303
  2. Webka <http://healthcare.utah.edu/bill/#hardship>
  3. Xafiiska La-talinta Maaliyadeed
  4. Xafiiska Dhismaha Adeegga Ganacsi
  5. Codsiyada waa in lagu soo gudbiyaa boostada PO Box 841482, Los Angeles, CA 90084-1482, fakiska at (801)213-3385 ama iimayl [billing@healthcare.utah.edu](mailto:billing@healthcare.utah.edu)
- H. Adeegyada aan u-qalmin inay helaan kaalmo lacageed:
1. Adeegyada ku saleysan lacagta kaashka ah
  2. Adeegyada ilkaha ee aan degdegga ahayn
  3. Ku takrifalka agabyada isbitaalka
  4. Ku takrifalka adeegga dawooyinka
  5. Diidmada codsashada ama raacitaanka maalgelinta la heli karo
  6. Adeegyada laga bixiyo South Main Clinic

TAKOOR LA'AAN. U of U Health kama saarto, umana diido gunnooyinka, ama si kale uma takoorto qof kasta sababo la xiriira jinsi, midab, asal qaran, diin, jinsiyad, nooca galmada, aqoonsiga/jiheynta jinsiga, macluumaadka hide-sidaha, aqoonsiga halwgabnimada, ama aasaaska naafonimada ama da'da gelitaanka, kaqeybgalka, ama helitaanka adeegyada iyo gunnooyinka hoos yimaada mid ka mid ah barnaamijyadeeda iyo waxqabadyadeeda, ha noqoto mid U of U Health ay si toos ah u fuliso ama ay mariso qandaraasle ama wakiil. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan siyaasaddan, kala xiriir Isuduwaha ADA/Qaybta 504 ee Jaamacadda: Agaasimaha, Xafiiska Fursadda loo Simanyahay iyo Waxqabadka Xaqijinta, (801) 581-8365 (Voice/TTY), (801) 585-5746 (Fax), ama loo soo mariyo Relay Utah 711 ama khadka bilaashka ah: (800) 735-2258 ama Adeegga Naafada Utah oo Isbaanish ag: (888) 346-3162.